



Barnaamijka Talaalka ee Guriga

Barnaamijka talaalka adiga oo guriga jooga wuxuu siiyaa talaalka KOFID-19 dadka reer Minnesota iyaga oo guryahooda jooga haddii aysan awood u laheyn in ay aadaan rug caafimaad ama goobaha kale ee talaalka is ay isku talaalaan. Dadkaan waxaa ka mid noqon kara dadka curyaanka ah, kuwa qaba xanuuna dabadheeraada, caruurta iyo daryeela/daryeel bixiyaal.

Yaa heli kara talaalka adiga oo guriga jooga

Dad badan oo reer Minnesota ah waxaa laga yaabaa in uu dhib ka haysto in ay guryahooda ka baxaan si ay isku talaalaan. Caqabadahaan waxaa laga yaabaa in ay sababayaan curyaanimada qofka iyo sidoo kale xaaladaha caafimaadka ee dabadheeraada iyo curyaanimada aan muuqan. Caruurta da'dooda 5 sano ay ka yartahay kuwaas oo u baahan meel degan waxaa laga yaabaa in ay u baahdaan in guriga iyaga oo jooga la talaalo. Duruufaha ay dadka u baahan karaan in guriga iyaga oo jooga la talaalo waxaa ka mid ah tusaalooyinka soo socda:

- Curyaanimo lixaadka ah oo ay ku jirto araga ama maqalka oo luma, ama qofka oo aan dhaq-dhaqaaqi Karin.
- Naafanimada korriinka sida Awtiisamka, Hoos-udhaca garaadka ama naafanimada waxbarashada la xidhiidha/xiriirta.
- Naafanimada caafimaadka dhimirka sida hab-dhaqanka iyo xaaladaha la xidhiidha murugada.
- Noocyada curuda maskaxda dhammaantood, sida xusuus guur ama dhaawac maskaxeed.
- Caruurta da'dooda ay ka yartahay 5 sano kuwaas oo laga yaabo in ay u baahdaan goobo gaar ah ama xasilloon.

Kani maahan liis dhamaystiran oo quseeya dadka laga yaabo in ay talaalka guriga ku qaataan. Haddii adiga ama qof qoyskaaga ka mid ah uu ka faa'iidi karo talaalka guriga, fadlan adeegso xogta hoos ku qoran ama la xidhiidh hay'ad si aad wax badan ooga ogaato.

Daryeele/daryeel bixiyaasha ee adeegsada barnaamijka talaalka guriga

Daryeele/daryeel bixiyaasha adeegsada barnaamijka talaalka iyada uu qofka guriga jooga waxay is talaali karaan isku xilli haddii ay u sheegaan qolada wax talaasha xilli hore. Daryeele/daryeel bixiyaasha waxaa noqon kara qof kasta oo bixiya adeeg si uu u caawiyo qof oo ay ku jiraan dadka aan qoyska ka mid aheyn kuwaas oo lacag lagu siiyo si ay adeeg u bixiyaan. Fadlan ogoow: Talaalada qaarkood lama damaanad qaadi karo, laakiin haddii uu qofka la talaalay uu yahay da'yar jira (0 ilaa 18 sano) (0 ilaa 18 sano), ogaysii talaal bixiyaha si talaalka ku habboon loo siiyo caruurta iyo dadka daryeelka bixiya.

Sida loo codsado guriga in aad ku qaadato talaalka

Dadka waxay codsan karaan talaalka guriga lagu qaato iyaga oo adeegsanaya:

- Xarunta Metropolitan ee noolasha madaxabannaan-Taleefanka:1-800-409-5594.
Email: mdh@mcil-mn.org.

Codsiga waxaa si badqab leh looga soo diraa Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH) waxaana loo diraa talaal bixiye ku sugan degmada meesha uu qofka ku noolyahay. Talaal bixiyaha waxaa laga yaabaa in ay ka socdaan hay'adaha daryeelka ee maxaliga ah kuwaas oo talaal siin kara dadka ku sugan guryahooda.

Waxa laga filan karo talaalka guriga?

Talaal bixiyaha ayaa lasoo teleefan ama emayl kula soo xiriir doona qof toddobaad gudahiisa kolka uu codsiga ka helo Waaxda Caafimaadka Minnesota.

Talaalada qaarkood lama damaanad qaadi karo, laakiin haddii uu qofka la talaalay uu yahay da'yar jira (0 ilaa 18 sano), ogaysii talaal bixiyaha si talaalka ku habboon lagu siiyo. Kolka ballanta talaalka guriga la qabto, talaal bixiyaha ayaa qofka gurigiisa ugu imaanaya xilliga ballanta iyo waqtiga si ay kuu siiyaan talaal.